**Jamhuuriyadda Soomaaliya**
**Xukuumadda Federaaliga KMG ee Soomaaliya**
**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

***The Transitional Federal Government of the Somali Republic***
**Office of the Prime Minister**

**Ref:XRW/OP/PR/ 0060/09/11** **Date: September 29. 2011**

## Shirkii golaha Wasiirada oo maanta lagu aqoonsaday golaha kumeel gaarka ah ee dalka Liibiya

**Muqdisho, Khamiis, Sep. 29.2011-------**Golaha Wasiirada ee Xukuumada Federaalka KMG ah Soomaaliya ayaa maanta yeeshay kulankoodii caadiga ahaa ee khamiislaha waxayna uga doodeen qodobo kala duwan oo ay ugu horeysay barnaamijka deeqaha waxbarashada ee dowladda Turkiga iyo weliba aragtida dowladda ee golaha kumeelgaarka ee Qaranka Liibiya.

Kulanka oo uu shir guddoominayay Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna Wasiirka Ganacsiga iyo Warshaddaha Mudane Cabdiwahaab Ugaas Xuseen Ugaas Khaliif iyadoo goluhu ugu horeyn ay ka doodeen qorshaha sugida Amniga waxayna si wada jir ah isugu raaceen in la adkeeyo sugida Amniga magaalada oo ay ku sugan yihiin hay'addo u soo gurmaday dalka.

Sidoo kale, shirka ayaa waxaa lagu dhegeystay warbixin ay soo jeedisay Wasaaradda Waxbarashada oo ku aadan qaabka loo maamulo iyo habka loo maro, waxaana Wasaaradu ay cadeysay in Dowladda Turkigu ay qaaday arday tiradoodu dhan tahay 350 Arday oo u badan arday heysata shahaadada dugisga dhexe, waxaana ugu dambeyntii goluhu ay go'aamiyeen in wixii haatan ka dambeeya loo saaro guddi si gaar ah uga shaqeeya deeqaha waxbarashada, qeybintiisa iyo weliba Imtixaan qaadista sidoo kalena la gaarsiiyo deeqahan dhamaan gobolada dalka.

Golaha ayaa looga warbixiyay safarka R/wasaaraha iyo kulamadii uu ka qeybgalay ee ay ka mid aheyd shirkii guud ee Q/midoobay ee ka dhacay magaalada New York, waxaana wax kama jiraan lagu sifeeyey warar sheegayay in ergada Soomaaliya uga qeybgashay shirka Q/midoobay (UN General Assembly) ay ka kaceen fadhiga markii uu khudbeynayay madaxweynaha dalka Iiraan Mudane Maxamud Axmedinijad.

Ugu dambeyntiina Golaha Wasiiradu waxay ka doodeen sugnaashaha golaha kumeelgaarka ah ee Qaranka Liibiya iyo aragtida ay ka qabto dowladda Federaalka KMG ah ee Soomaaliyeed, waxayna isku raaceen in golahan loo aqoonsado golaha saxda ah ee kumeelgaarka ah ee Qaranka Liibiya.

**+252615615536608 +252699998854 media@opm.gov.so ayarisow@opm.gov.so Mogadishu, Somalia**